

Tiirarka aminga bulshada

Mahad Allaa iska leh , Allaha Caalamka oo kitaabkiisa Kariimka ku yiri:

{الَّذِينَ آمَنُوا وَلَمْ يُبْسُوَا إِيمَانَهُم بِظُلْمٍ أُولَئِكَ لَهُمُ الْأَمْنُ وَهُمْ مُهْتَدُونَ}،
(Kuwa xaqaa rumeyay oon ku dheehin Iimaankooda dulmi (gaalimo) kuwaasaa nabadgalyo u sugnaatay iyagaana hanuunsan)

Waxaan qirayaan inuusan jirin Illaah kale Alle mooyee oo aan lahayn mid wax la wadaago, waxaana qirayaan in sayidkeena iyo nabigeena Muxammad addoonkiisa uu yahay iyo rasuulkiisa, Allow nabadgalyo iyo naxariis iyo barako korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa iyo qofkii ku raacay wanaag ilaa maalinta qiyaame

Intaas kaddib:

Nimcada amniga waxay ka mid tahay nimcooyinka uu Alle (caza wa jalla) ku galladaystay addoomihiisa, wuxuu leeyahay Allaha xaqqa ah (SW):

{لِيَلَافَ قُرِيشٌ * إِيَلَافُهُمْ رَحْلَةُ الشِّتَّاءِ وَالصَّيفِ * فَلَيَعْبُدُوا رَبَّ هَذَا
الْبَيْتِ * الَّذِي أَطْعَمَهُمْ مِنْ جُوعٍ وَآمَنَهُمْ مِنْ حَوْفٍ}،

(Caadaysigii Qureesh * ay ka caadayeeshen Safarka xagaaga iyo jilaalka darteed * ha u

(2)

caabudeen Eebeha beydkan (Kacbad) * Eebahii ka quudiyay gaajo, kana aamingaliyay cabsi) wuxuu leeyahay (SW):

{أَوْلَمْ نُمَكِّنْ لَهُمْ حَرَمًا أَمِنًا يُجْبِي إِلَيْهِ ثَمَرَاتُ كُلِّ شَيْءٍ رِزْقًا مِنْ لَدُنَّا
وَلَكِنَّ أَكْثَرَهُمْ لَا يَعْلَمُونَ}،

(Miyaanaan siinin xaram aamina oo la keeno midhaha wax kasta quudin darteed oo xagganaga ah, laakiin badankood ma ogal), wuxuu leeyahay Alle:

{أَوْلَمْ يَرَوْا أَنَّا جَعَلْنَا حَرَمًا أَمِنًا وَيُتَخَطَّفُ النَّاسُ مِنْ حَوْلِهِمْ أَفِإِلْبَاطِلِ
يُؤْمِنُونَ وَبِنِعْمَةِ اللَّهِ يَكْفُرُونَ}،

(Miyeyna arkeyn gaaladii (Qureesheed) inaan yeelney (dajiney) xaram aamin ah oo la dafayo dadka dhinacyadooda ah, ma baadilbay rumeyn oo nicmada Eebe ka gaaloobi), wuxuu laayahay nabigeena:

(مَنْ أَصْبَحَ مِنْكُمْ أَمِنًا فِي سِرْبِيهِ مُعَافًى فِي جَسَدِهِ عِنْدَهُ قُوتُ يَوْمِهِ فَكَانَمَا
جِيزْتُ لَهُ الدُّنْيَا بِحَذَافِيرِهَا).

(Qofkii ku bariyo dadkiisa asoo amaan qaba jirkiisana u fayow quudka maalintiisana haysta waa qof adduunyada oo dhan loo soo jamciyay).

(3)

Waxaan shaki ku jirin in amniga uu yahay shaqo bulsheed oo ay wadaagayaan dadka dalka kuwada nool oo dhan, ma awoodo qof inuu naftiisa ama qoyskiisa amni siyo asoo ka dheer amniga bulshada, dadka markay ku sugar yihiin bulshadooda iyo dalkooda waxay u eg yihiin dad doon saran, oo aysan suurtagal ahayn inay qaar kaliya ka badbaadaan, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgallyo korkiisa ha ahaatee):

(مَثَلُ الْقَائِمِ عَلَىٰ حُدُودِ اللَّهِ وَالوَاقِعِ فِيهَا، كَمَثَلُ قَوْمٍ اسْتَهْمُوا عَلَىٰ سَفِينَةٍ، فَأَصَابَ بَعْضُهُمْ أَعْلَاهَا وَبَعْضُهُمْ أَسْقَلَهَا، فَكَانَ الَّذِينَ فِي أَسْقَلَهَا إِذَا اسْتَقَوْا مِنَ الْمَاءِ مَرُّوا عَلَىٰ مَنْ فَوْقَهُمْ، فَقَالُوا: لَوْ أَنَا خَرَقْنَا فِي نَصِيبِنَا خَرْقًا وَلَمْ نُؤْذِ مَنْ فَوْقَنَا، فَإِنْ يَتْرُكُوهُمْ وَمَا أَرَادُوا هَلُكُوا جَمِيعًا، وَإِنْ أَخْذُوا عَلَىٰ أَيْدِيهِمْ نَجَوْا، وَنَجَوْا جَمِيعًا).

(Tusaalahaa kan ku taagan xuduudda Alle iyo kan ku dhacaya waa sida dad doon qorituur u sameytay, qaar korkeeda ayay heleen qaarna hoosteeda, kuwa hoos markay biyo dhaansanayaan waxay marayaan kuwa ka korreeya, waxay dhaheen: haddaan duleelino qeybteena oo aanan dhibin dadka naga korreeya, hadday u daayaan wixii ay rabaan way wada halaagsamayaan, hadday gacmaha ka qabtaanna way wada badbaadaayan)

Sidaa awgeed amniga bulshada wuxuu leeyahay tiirar waxyaalo adkaynaya waxaa ka mid ah: in la xoojiyo

(4)

dhanka iimaanka kaasoo xasilooni u keenaya bulshada, kana reebaya xagjirnimo iyo qalooc xagga fikriga, wuxuu leeyahay Alle (SW):

{الَّذِينَ آمَنُوا وَتَطْمَئِنُ قُلُوبُهُمْ بِذِكْرِ اللَّهِ أَلَا بِذِكْرِ اللَّهِ تَطْمَئِنُ الْقُلُوبُ}

(Ee ah kuwa rumeeyay xaqa kuna xasishay quluubtoodu xuska Alle, xuska Alle ayayna ku xasishaa quluubtu)

Iimaanka Alle (caza wa jalla) waa midka keena amniga gudaha ee dadka bulsha ku nool taasoo bulshada oo dhan saamaysa.

Waxaa ka mid ah: dhinaca dhaqaalaha oo ku tiirsan shaqada iyo wax soo saarka iyo sugidda, sidaa awgeed diinteeна xaniifka ah waxay ku boorrisay shaqada, iyo in la sugo lana hagaajiyo, wuxuu leeyahay Alle (SW):

{وَقُلْ أَعْمَلُوا فَسِيرِي اللَّهُ عَمْلَكُمْ وَرَسُولُهُ وَالْمُؤْمِنُونَ،}

(Dheh: camalfala wuu arki doonaa Alle camalkiina iyo rasuulkiisa iyo mu'miniinta), wuxuu leeyahay (caza wa jalla):

{وَأَحْسِنْ كَمَا أَحْسَنَ اللَّهُ إِلَيْكَ وَلَا تَبْغِ الفَسَادَ فِي الْأَرْضِ إِنَّ اللَّهَ لَا يُحِبُّ الْمُفْسِدِينَ،}

(Samana fal sida Eebe kuugu samo falay hana la doonin fasaad dhulka, Eebe ma jecla fasaadiyaashee)

(5)

Wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ إِذَا عَمِلَ أَحَدُكُمْ عَمَلاً أَنْ يُتْقِنَهُ،

(Wuxuu jecel yahay Alle midkiina hadduu camalfalo inuu sugo), taas waxay keenaysaa in amni la helo bulshadana ay degto.

Waxaa ka mid ah in la sugo qiyamka iskaashiga iyo isu naxariisashada bulshada dhexdeeda, diinteeна xaniifka ah si gaar bay ugu dadaashay dhinacan, sakada ayay waajib ka dhigtay, sadaqada ayay ku boorrisay, waqfiga ayay jideysay wayna ku dhiirragalisay, wuxuu leeyahay Allaha xaqqa ah (SW):

{مَثَّلَ الَّذِينَ يُنْفَقُونَ أَمْوَالَهُمْ فِي سَبِيلِ اللَّهِ كَمَثَّلَ حَبَّةً أَنْبَتَتْ سَبْعَ سَنَابِلَ فِي كُلِّ سَنْبُلَةٍ مِائَةً حَبَّةً وَاللَّهُ يُضَاعِفُ لِمَنْ يَشَاءُ وَاللَّهُ وَاسِعٌ عَلَيْهِمْ}،

(kiwa ku bixiya xoolahooda jidka Eebe waxay la mid yihiin xabbad (Masago ah) oo bixisay todobo sabuul, sabuul kastana bixiyay boqol xabbo Eebe waa u laab laabaa (Ajirka) cidduu doono Eebana waa deeq badane og), wuxuu leeyahay Alle (jalla wa calaa):

{وَمَا تُنْفِقُوا مِنْ خَيْرٍ فَلَأَنْفَسُكُمْ وَمَا تُنْفِقُونَ إِلَّا ابْتِغَاءَ وَجْهِ اللَّهِ وَمَا تُنْفِقُوا مِنْ خَيْرٍ يُوَفَّ إِلَيْكُمْ وَأَنَّمَا لَا تُظْلَمُونَ}،

(Waxaad bixinaysaan oo khayr ah naftiinaa iska leh, umana bixisaan doonid waji Eebe mooyee, waxaad bixisaan oo khayr ahna waa laydiin oofin, idinkoon laydin dulmiyeyn).

(6)

Wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

(مَنْ نَفَسَ عَنْ مُؤْمِنٍ كُرْبَةً مِّنْ كُرْبَةِ الدُّنْيَا، نَفَسَ اللَّهُ عَنْهُ كُرْبَةً مِّنْ كُرْبَةِ يَوْمِ الْقِيَامَةِ، وَمَنْ يَسَرَ عَلَى مُعْسِرٍ يَسِّرَ اللَّهُ عَلَيْهِ فِي الدُّنْيَا وَالْآخِرَةِ، وَمَنْ سَتَرَ مُسْلِمًا سَتَرَهُ اللَّهُ فِي الدُّنْيَا وَالْآخِرَةِ، وَاللَّهُ فِي عَوْنَانِ الْعَبْدِ مَا كَانَ الْعَبْدُ فِي عَوْنَانِ أَخِيهِ)،

(Qofkii mu'min ka feyda kurbo ka mid ah kurbadaha adduunka Alle ayaa ka Feydaya kurbo ka mid ah kurbadaha maalinta qiyame, qofkii u fududeeya qof culays haysta Alle adduun iyo aakhiro ayuu u fududeynayaa, qofkii asturo qof muslin ah Alle adduun iyo aakhiro ayuu asturayaa, Alle wuxuu u gargaarayaa addoonka intuu addoonka u gargaarayo walaalkiisa).

Wuxuu leeyahay (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

(مَنْ كَانَ عِنْدَهُ فَضْلٌ ظَهَرَ فَلِيَعْدُ بِهِ عَلَى مَنْ لَا ظَاهِرٌ لَهُ، وَمَنْ كَانَ عِنْدَهُ فَضْلٌ زَادَ فَلِيَعْدُ بِهِ عَلَى مَنْ لَا زَادَ لَهُ)

(Qofka haysto gaadiid dheeraad qofkaan haysanin ha ugu deeqo, qofkii haysta sahay dheeraad ah ha ugu deeqo qofkaan haysanin sahay) ilaa aan moodno inaan xaq u lahayn dheeraadka inaan haysano.

(7)

Waxaa ka mid ah tiiraraka amniga bulshada in la sugo mabda'a sinnaanta dadka, dadka way siman yihiin sida ilkaha shanlada oo kale, bulshada amaanka ah oo hormarsan dadka ma kala saarto, iyadoo la eegayo midabka ama isirka, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

(يَا أَيُّهَا النَّاسُ، أَلَا إِنَّ رَبَّكُمْ وَاحِدٌ، وَإِنَّ أَبَاكُمْ وَاحِدٌ، أَلَا لَا فَضْلٌ لِعَرَبِيٍّ عَلَى عَجَمِيٍّ، وَلَا لِعَجَمِيٍّ عَلَى عَرَبِيٍّ، وَلَا أَحْمَرَ عَلَى أَسْوَدَ، وَلَا أَسْوَدَ عَلَى أَحْمَرَ، إِلَّا بِالثَّقَوْفَى)،

(Dadow: rabbigiina waa hal, aabbihiinana waa hal, qof carab ah kama fadli badna qof cajam ah, qof cajam ahna kama fadli badna qof carab ah, qof guduudanna kama fadli badna qof madow, qof madowna kama fadli badna qof guduudan Alle ka cabsi mooyee, kiina ugu qiimaha badan xagga Alle waa kiina ugu taqwo badan)

Dadka bulshada ku nool waxay ku kala duwan yihiin kaliya awoodda iyo kartida iyo qofka waxa uu bixinayo dadaal ah oo uu bulshada ugu faa'idaynayo.

Mahad oo dhan waxay u sugnaatay Allaha caalamka, naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato kan lagu khatimay anbiyada iyo rususha sayidkeenna Muxammad

(8)

(naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee), iyo dhammaan ehelkiisa iyo asxaabtiisa.

Shaki kuma jiro keenidda amniga bay'da inay ka mid tahay tiirarka amniga bulshada, bay'ada in la kobciyo, lagana ilaaliyo dhibka ama halista, wuxuu leeyahay Alle (caza wa jalla):

{هُوَ أَنْشَأَكُمْ مِنَ الْأَرْضِ وَاسْتَعْمَرَكُمْ فِيهَا،}

(Asagaana idiinka ahaysiiyey dhulka idinkuna camiray dhexdiisa)

Wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

(لَا يَغْرِسُ الْمُسْلِمُ عَرْسًا، فَيَأْكُلَّ مِنْهُ إِنْسَانٌ، وَلَا دَابَّةٌ، وَلَا طَيْرٌ، إِلَّا كَانَ لَهُ صَدَقَةٌ إِلَى يَوْمِ الْقِيَامَةِ)،

(Muslin ma tallaalayo tallaal oo uu ka cunayo shinbir ama aadane ama xoolo hadday dhacdo sadaqo ayay u noqonaysaa ilaa maalinta qiyaame)

Wuxuu leeyahay (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

(الْإِيمَانُ بِضُعْفٍ وَسِعْوَنَ - أَوْ بِضُعْفٍ وَسِئْوَنَ - شُعْبَةً، فَأَفْضَلُهَا قَوْلُ لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ، وَأَذْنَاهَا إِمَاطَةً الْأَذَى عَنِ الظَّرِيقِ).

(Iimaanka waa toddobaatan iyo dhowr ama lixdan iyo dhowr qeyb, waxaa ugu fiican oraahda laa ilaaha illallaah, waxaana ugu hooseeya in jidka qashinka laga leexiyo, xishoodkana waa qeyb ka mid ah iimaanka)

(9)

Maxaa inooga baahi badan in dhamaan dadaallada laysku daro si loo suurtagalin lahaa amniga bulshada, loona ilaalin lahaa, iyadoo loo soo marayo dhamaan hay'adaha dowladda ee ah ciidanka qalabka sida nabadsugidda, garsoorka, qoyska, waxbarashada, hay'adaha diinta iyo kuwa dhaqanka iyo kuwa rayidka, si amni ay u helaan dhamaan dadka bulshada ku nool iyagoo dadaalkooda isku xiran yahay.

**Ilaahayow nimcada amniga iyo nabadda joogto
nooga dhig sidoo kale masarteen qiimaha badan iyo
dhamaan dalalka muslimiinta**